

Xaqijinta Booqashada Telefoonka (**TVV**) oo sidoo kale loo yaqaan **IVR**, waa hab lagu duubo wakhtigaaga aad soo shaqaysay. Bilowga iyo dhamaadka shaqadaada, waxaad isticmaali doontaa taleefoon si aad ugu ogeysiiso nidaamka xaashida wakhtiga inuu ogaado inaad bilawday shaqada (saacadda-gelista iyo dhamaadka shaqadaada inaad dhammaatay (saacadda-bixidda). Nidaamku wuxuu isticmaalaa ereyga Shaqaale si uu u qeexo Daryeel bixiyaha iyo ereyga Macmiil, si uu u qeexo qofka adeegyada helaya.

Aan marno tillaaboyinka saacadda-soo gelista:

1. Ka wac lambarka bilaashka ah taleefanka intaad joogto guriga ka-qaybqaataha.
2. Taabo "1" si aad u gasho saacada shaqo-gelista
3. Geli aqoonsigaaga shaqaale ee lix-lambarka ah. Nidaamku wuxuu dib kuugu akhrin doonaa aqoonsiga, waxaad xaqijin doontaa aqoonsiga adigoo riixaya "1".
4. Geli aqoonsiga macaamiisha ee lixda-lambarka ah. Nidaamku wuxuu dib kuugu akhrin doonaa aqoonsiga, waxaad xaqijin doontaa aqoonsiga adigoo riixaya "1".
5. Nidaamku wuxuu ku dhawaaqi doonaa "Waad ku mahadsan tahay saacadda aad soo gashay. Soo wac marka aad diyaar u tahay inaad shaqada ka baxdid. nabad gelyo."
6. Saacaddada soo gelistu way dhamaystiran tahay.

Aan marno tillaaboyinka saacadda-kabixidda:

1. Ka wac lambarka bilaashka ah taleefanka intaad joogto guriga ka qaybqaataha.
2. Taabo "2" si aad u baxdid.
3. Geli aqoonsigaaga shaqaale ee lixda-lambar ah. Nidaamku wuxuu dib kuugu akhrin doonaa aqoonsiga, waxaad xaqijin doontaa aqoonsiga adigoo riixaya "1".
4. Geli aqoonsiga macaamiisha ee lixda lambar ah. Nidaamku wuxuu dib kuugu akhrin doonaa aqoonsiga, waxaad xaqijin doontaa aqoonsiga adigoo riixaya "1".
5. Geli aqoonsiga lambarka adeega. Nidaamku wuxuu dib kuugu

akhrin doonaa aqoonsiga, waxaad xaqijin doontaa aqoonsiga adigoo riixaya "1".

6. Nidaamku wuxuu ku dhawaaqi doonaa "Waad ku mahadsan tahay saacadda aad baxday. nabad gelyo."
7. Saacaddada bixitaanku way dhamaystiran tahay.

Taasi waa taas! Nadaamka waxaa loo sameeyay in uu ahaado mid si fudud loo isticmaalo waana inuu ku qaataa wax ka yar hal daqiiqo bilowga iyo dhamaadka shaqo kasta oo aad shaqeyso.

Halkan waxaa ah meel aad ku qorto macluumaadka aad u baahan doonto marka aad samaynayso saacadda-soo gelista iyo ka baxitaanka. Ka qaybqaataha aad u shaqeyso ama **FMS** ee caawiya ka qaybqaataha ayaa ku siin doona macluumaadka aad u baahan tahay.

Macluumaadka Aad U Baahan Tahay	Macluumaadkayga
Telefoonka lambarka TVV/IVR	
Aqoonsigaya haqaalenimada	
Aqoonsiga ka qaybqaataha	
Aqoonsiga Koodhka Adeegga/yada	

Haddii aad wali hayso su'aalo, fadlan si toos ah ula xiriir Bixiyaha FMS si aad u heshid caawimaad.